**OGEYSIISKA DHAQAMADA ASTURNAANTA XOGTA**
**ADEEGYADA AADANAHA SOUTH METRO**
Nooca Ayaa Dhaqangalay: 2/13/2026

**OGAYSIISKANI WAXA UU SHEEGAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAAD EE KUGU SAABSAN LAGA YAABO IN LOO ISTICMAALO LOONA SHAACIYO IYO SIDA AAD MARIN UGU HELI KARTID MACLUUMAADKAN. FADLAN U EEG SI TAXADAR LEH.**

Ogaysiis Gaar ah oo Ku Saabsan Diiwaanada Dhibaatada Isticmaalka Daroogada (SUD): Diiwaanada qaarkood ee ku saabsan ogaanshaha SUD, daawaynta, ama gudbinta waxaa ilaaliya sharciga federaalka (42 C.F.R. Qaybta 2). Diiwaanadani waxay leeyihiin ilaalino qarsoonaanta ah oo dheeraad ah oo ka baxsan HIPAA. Ogaysiiskani wuxuu sharraxayaa sida aan u isticmaalno una bixino diiwaanadaas iyo xuquuqahaaga ku aadan iyaga.

**Maxaan u ururinaynaa macluumaad adiga kugu saabsan?**

- Si lagaaga caawiyo helitaanka adeegyada caafimaadka, caafimaadka dhimirka, adeegyada maaliyadeed ama bulsho.
- Si laguu siiyo daaweyn, daryeel ama adeegyo taageero ah.
- Si aad u soo ururiso magdhawga adeegyada aan ku siinno.
- Si aan kaaga aqoonsanno dadka kale ee aad isku magaca tihiin ama aad isku magac egtihiin.
- Sababtoo ah waxaa ubaahan xeerarka federaalka ama gobolka.

**Ma tahay inaad ka jawaabto su'aalaha aan ku weydiinno?**
Waxaan u isticmaalnaa macluumaadka aad bixiso si aan u xaqiijino in aad hesho daryeel tayo sare leh. Si aan u xaqiijino in aad hesho daryeelka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah, waxaa laga yaabaa in aanu ku weydiino macluumaad shakhsi ahaaneed oo adiga kugu saabsan. Waxaan ilaalin doonaa qarsoonaanta macluumaadka aad bixiso sida ay u baahan yihiin sharciyada gobolka iyo federaalka iyo waajibaadka anshaxeed ee naga kaa saaran adiga. Ku guuldarreysiga in aad bixiso macluumaadka lagaa codsado waxaa laga yaabaa in ay saameyso awoodda aan u leenahay in aan ku siino adeegyada. Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in aadan u qalmin adeegyada haddii aad diido in aad bixiso macluumaadka loo baahan yahay. Shaqaalahaaga wuxuu kuu sharrixi doonaa sababta aan ugu baahanahay macluumaadka iyo cawaaqibta suurtagalka ah haddii aan la bixin macluumaadka qaar marka la codsado. Haddii aad si ula kac ah u bixiso macluumaad khaldan, tani waxay noqon kartaa khiyaano waxaana laga yaabaa inay nagu waajibto inaan u sheegno masuuliyiinta sharciga.

**Isticmaalada iyo Shaacinta:**

Macluumaadka qaar -- mararka qaar la yiraahdo “macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo” ama “PHI” -- ayaa laga yaabaa in la isticmaalo oo la bixiyo iyadoo aan oggolaansho lagaa haysan sababaha xagga hoose ku qoran dartood (tusaale ahaan, daawaynta, lacag-bixinta, iyo hawlgallada daryeelka caafimaadka), marka laga reebo diiwaannada ay ilaaliso 42 C.F.R. Qaybta 2 (diiwaanada SUD) ayaa raaca xeerar adag. Halki ay khusayso Qaybta 2, ma isticmaali doono ama ma bixin doono diiwaanadaas iyadoo aan lahayn oggolaanshahaaga oo qoran ilaa Qaybta 2 si gaar ah u oggolaato bixinta (tusaale ahaan, xaalad degdeg ah oo caafimaad oo daacad ah, warbixinnada xadgudubka/ dayacaada carruurta; shaqaale u qalma si ay ugu sameeyaan cilmi-baaris, hubin, ama qiimayn barnaamij; ama sida uu oggolaaday amar maxkamadeed oo habboon). Tusaalooyinka noocyada xog bixinta ee aan bixin karno ayaa hoos ku taxan qaybta cinwaankeedu yahay “Isticmaalka la oggol yahay ee macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo oggolaansho la’aan” waxaana ka mid ah xog bixinta si loo helo daaweyn, lacag bixin, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka; si laguu ogeysiiyo ballamaha, xulashooyinka kale ee daaweynta ama kababka caafimaadka la xiriira ee laga yaabo in laguu heli karo; shakhsiyaadka ku lug leh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga; ama cilmi baaris. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan xogtaada ku bixinno xaalado kala duwan oo gaar ah halkaas oo uu sharcigu noo oggol yahay in aan bixinno xogtaada. Xaaladaha gaarka ah waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, xogsiinta la-hawlgalayaasha ganacsiga ama hay’adaha la xiriira kuwaasoo fuliya hawlo iyo adeegyo lagama maarmaan ah iyaga oo naga wakiil ah; xaaladaha caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha; dacwo ama ujeedooyin kale oo sharci ah; ama ujeedooyin wargelin jabsasho.

1. Dhammaan xog bixinnadeena waxay waafaqsanaan doonaan sharciga gobolka iyo federaalka. Haddii adeegsi ama xog shaacin uu mamnuuco hal sharci laakiin uu oggol yahay sharci kale, waxaan raaci doonaa sharciga sida aadka ah u ilaalinaya asturnaanta xogtaada.
2. Dhammaan adeegsiyada kale iyo shaacinta waxaa lagu samayn doonaa oo keliya oggolaansho qoran. Kuwani waxaa ku jiri kara xog bixinnada laga leeyahay ujeedooyin suuqgeyn ama ka dhigan iibinta xogtaada. Waxaad oggolaanshaha ka laaban kartaa wakhtigi aad doonto balse xog bixinnada aan samaynay anagoo cuskanayno oggolaanshahaaga kahor inta aadan ka laaban wax saameyn ah kuma yeelan doonto ka laabashadaada.

**Diiwaanada Dhibaatada Isticmaalka Daroogada (SUD) ee Hoos Yimaada 42 C.F.R. Qaybta 2**

Qaar ka mid ah diiwaanadaada waxaa ilaalin kara sharciga federaalka ee 42 C.F.R. Qaybta 2 ("Qaybta 2"). Marka diiwaanada ay ilaaliso Qaybta 2, waa in aan raacno sharciyo ka adag HIPAA oo ku saabsan sida diiwaannadaasi loo isticmaali karo loona bixin karo. Tusaale ahaan: (1) Isticmaalka iyo bixinta guud ahaan waxay u baahan yihiin oggolaanshahaaga oo qoran. Ma isticmaali doono ama ma bixin doono diiwaanada Qaybta 2 ilaa bixinta ay si cad u oggoshahay Qaybta 2 (tusaale ahaan, si loo daboolo xaalad degdeg ah oo caafimaad oo daacad ah, si loo sheego xadgudubka ama dayacaada carruurta; shaqaale u qalma si ay ugu sameeyaan cilmi-baaris, hubin, ama qiimayn barnaamij; ama sidi kale ee uu oggolaaday amar maxkamadeed oo habboon). (2) Xadadka dib-u-bixinta. Dadka hela diiwaanada Qaybta 2 waxaa ka mamnuuc ah inay dib-u-bixiyaan diiwaanadaas ilaa sii bixin kale ay oggoshahay Qaybta 2 mooyee ama aad ku oggolaato qoraal ahaan. (3) Sharci aad u adag. Haddii Qaybta 2 ay ka ilaalin badan tahay HIPAA xagga diiwaanadaan, waxaan u hoggaansami doonaa Qaybta 2.

**Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan in diiwaanadaada ay ilaaliso Qaybta 2 iyo in kale, fadlan la xiriir Sarkaalkeena HIPAA/Asturnaanta Sirta (ka eeg qaybta "Contact" ee hoose).**

U isticmaalka Dacwadaha Sharci Waa Mamnuuc: Diiwaanada Qaybta 2 – iyo marqaati kasta oo ku saabsan waxa ku jira diiwaanadaasi -- looma isticmaali karo ama laguma bixin karo wax dacwad madani ah, mid dembiyeed, maamul, ama sharciyeed oo adiga kaa dhan ah ilaa (1) aad bixiso oggolaansho qoran, ama (2) ay maxkamadi soo saarto amar ka dib marki lagu siiyay ogeysiis iyo fursad lagugu maqlo. Amar kasta oo maxkamadeed oo oggolaanaya bixinta diiwaanada waa inay la socotaa u-yeeritaan maxkamadeed ama nidaam kale oo sharci ah oo qasbaya bixinta diiwaanada.

**Xuquuqaha Shakhsiga:**

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho farriimo qarsoodi ah oo ku saabsan caafimaadkaaga.
- Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in la xaddido ama la koobo xogta aan adeegsanno ama ku bixinno si loo helo daaweyn, lacag bixin, ama hawlaha daryeelka caafimaadka. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad codsato in la xaddido xogta aan siinno qof ku lug leh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaaga, sida xubin qoyska ah ama qof saaxiib ah. Tusaale ahaan, waxaad codsan kartaa in xog ku saabsan ogaansho xanuun gaar ah ama daaweyn aan la wadaagin lammaanahaaga. Waa in aad xogta la xaddidayo ku codsataa qoraal ahaan. Had iyo jeer naloogama baahna in aanu ogolaano codsigaaga ilaa aad na waydiisato inaanu xaddidno isticmaalka iyo u bixinta macluumaadkaaga ujeedooyin lacag bixin sida si buuxda hoos loogu sharaxay.
- Xuquuq Lagu Xaddido Bixinta Diiwaanada SUD: Waxaad codsan kartaa xaddidaadaha bixino gaar ah oo ka mid ah diiwaanadaada Qaybta 2.
- Xaqa La Xisaabtanka Bixinada Diiwaanada SUD: Waxaad codsan kartaa la xisaabtanka bixino gaar ah oo ka mid ah diiwaanadaada Qaybta 2.
- Xaq Lagu Xareeyo Cabasho Ku Saabsan Diiwaanada SUD: Waxaad cabasho u gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha oo ku aadan ku xadgudubyada suurtagalka ah ee Qaybta 2 adiga oo aan ka cabsanaynin aargoosi (ka eeg qaybta "Complaints (Cabashooyinka)" xagga hoose).
- Haddii aad lacagta oo dhan ka dhiibto jeebkaaga, oo aad codsatay in aan caymiskaaga ku dallicin adeeg gaar ah, waxaad codsan kartaa in macluumaadka ku saabsan adeegaas aan loo bixin sababo lacag bixin ama hawlo daryeel caafimaad.
- Waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso oo aad hesho nuqul ka mid ah macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo.
- Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in wax laga beddelo macluumaadkaaga haddii aad dareento in uusan sax ahayn. Haddii aan go'aaminno in beddelka noocaas ahi aanu habboonayn waxaad gudbin kartaa bayaan qoran oo aad uga soo horjeedo aragtideena waxaana codsiga noocan ah iyo diidmada lagu dari doonaa xog bixin kasta oo mustaqbalka ah.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho xisaabinta bandhigyada laga sameeyay macluumaadkaaga caafimaad ee la ilaaliyo.
- Haddii aad oggolaatay inaad ku hesho ogeysiiskan si elektaroonig ah, waxaad weli heli kartaa nuqul warqad ah oo ka mid ah bayaankan qarsoodiga ah.

**Waajibaadkeena:**

Waxa ay naga rabaan sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka in aan ilaalino asturnaanta macluumaadka caafimaadka ee la ilaaliyo iyo inaan ku siino ogeysiis ku saabsan waajibaadkeena sharci iyo dhaqamadeena asturnaanta xogta. Waxaa sidoo kale nagala rabaa in aan ogeysiino shakhsiyaadka ay saamaysay kadib jabsashada xogta caafimaadka ee la ilaaliyo ee aan ammaanka ahayn. Ogeysiiskan waxaa lagu dhajiyaa xarun kasta waxaana lagu siinayaa waqtiga booqashadaada koowaad. Sharcigu waxa uu nooga baahan yahay in aanu u hogaansano ogaysiiska dhaqangashan, laakiin waxaan xaq u leenahay in aan dib u eegno qodobada ogaysiiskan wakhtigi aan doono. Waxaa lagu siin doonaa nuqul ka mid ah ogeysiisyada dib loo eegay wakhtiga ballantaada xigta. Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale dadka naafada ah adiga oo wacaya shaqaalahaaga. Dadka maqalka naafada ka

ah waxay la xiriiri karaan Adeegga Gudbinta Minnesota 1-800-627-3529 (TTD), 711 ama 1-877-6273848 (adeegyada gubinta hadal ilaa hadal).

**Waajibaadkeena Ku Aadan Diiwaanada SUD:**
Marka diiwaanadaada ay ilaaliyaan 42 C.F.R. Qaybta 2, waa in aan:

- Ilaalinaa qarsoonaanta diiwaanadaas si waafaqsan Qaybta 2;
- Bixinaa Ogeysiiskan qeexaya waajibaadkeena iyo xuquuqdaada ee ku saabsan diiwaannadaas;
- U hogaansannaa xaddidaadaha Qaybta 2 ee isticmaalka, bixinta, iyo dib-u-bixinta diiwaanadaas; iyo
- Raacnaa shuruudaha Ogeysiiskan sida ay ula xiriiraan diiwaanada Qaybta 2.

**Cabashooyinka:**
Haddii aad ka shakido in aan ku guuldarreysanay inaan u hoggaansanno ogeysiiskan ama sharciga lagu dabaqi karo, waxaad walaacaada u gudbin kartaa Sarkaalkeenna Asturnaanta Xogta ee ku xusan xagga hoose. Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa hay'adaha sharciga ee ku habboon ee gobolka ama federaalka oo uu ku jiro. Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka ee ciwaanka hoos ku qoran. Cabashada waa in la qoraa oo lagu xareeyaa 180 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda aad ogaatay ama ay ahayd inaad ogaato xuquuqdaada in lagu xadgudbay. Kuuma diidi karno adeegyo ama kaagama aarsan karno sababo ah in aad naga gudbisay cabasho. Waxaad sidoo kale cabasho ka xarayn kartaa HHS oo ku aadan xadgudubyada suurtagalka ah ee 42 C.F.R. Qaybta 2.

**Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah**
Wuxuu Meel Dhexe isugu Keenaa Hawlgallada Maareynta Kiisaska
Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha Maraykanka
200 Independence Avenue, S.W.
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201
Taleefanka (Wicitaanka Bilaashka): 1-800-368-1019
TDD (Wicitaanka Bilaashka): 1-800-537-7697
Barta Cabashada: ocrportal.hhs.gov

**Hay'adaha Adeegga:** Ogeysiisku waxa uu khuseeyaa adeegyada ay bixiyaan Adeegyada Aadanaha ee South Metro oo ay ku jiraan adeegyada ay bixiyaan RADIAS Health, Community Foundations, Representative Payee Services, ReEntry House, ReEntry ACT, ReEntry Crisis Residential, ReEntry Housing Support Program, iyo Carlson Drake House.

**Xiriirka:** Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan macluumaadkan, waxaad weydiin kartaa shaqaalahaaga ama la xiriir Sarkaalkeenna u Hoggaansanaanta HIPAA ee ku sugan 166 4th Street E, Saint Paul, Minnesota 55101 ama 651-291-1979.

**<u>Isticmaalka la oggol yahay ee xogta caafimaadka ee la ilaaliyo iyada oo aan la haysan oggolaansho</u>**

Kuwa soo socdo waxay sharraxayaan qaar ka mid ah siyaabaha laga yaabo in aan u isticmaalno oo aan u bixinno macluumaadka caafimaadka ee adiga lagugu aqoonsanayo. Waxaa jiri kara xaalado kale oo xog bixinta loo baahan yahay ama la oggol yahay:

1. Siinta bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka marka loogu baahdo daawayntaada hadda.
2. Si laguu ogeysiiyo dheefo suuragal ah oo la xiriira caafimaadka oo laga yaabo in aad heli karto.
3. Haddii aadan awoodin in aad oggolaato ama diido isticmaalka ama xog bixinta sabab ah awood la'aan ama duruuf xaalad degdeg ah, xog bixintuna ay ku jirto dantaada ugu wanaagsan, waxaan xogta toos u siin karnaa dadka ku lugta leh daryeelka ama lacag bixinta la xiriirta daryeelkaaga caafimaadka.
4. Cilmi baaris uu oggolaaday Guddi Dib-u-eegis Hay'adeed, iyadoo la raacayo tilmaamaha ku jira 45 CFR 164.512(i) iyo shuruudaha ogeysiinta ee Minn. Stat. § 144.295.
5. Siinta la-hawlgalayaasha ganacsi ama kuwo naga tirsan haddii aan helno dammaanad lagu qanco in qaataha uu si habboon u ilaalin doono macluumaadka.
6. Siinta maamul caafimaadka dadweynaha ah oo sharcigu oggol yahay inuu ururiyo macluumaadka si looga hortago ama loo xakameeyo cudur, dhaawac, ama naafo.

7. Si looga difaaco RADIAS Health, ama la-hawlgale, qandaraasle, shaqaale, ama wakiilka RADIAS Health, tallaabo sharci ah ama dacwad kale oo aad keentay haddii isticmaalkaas ama siidayntaas uu u baahan yahay sharciga gobolka iyo federaalka.
8. Marka sharcigu u baahan yahay si loo bixiyo ogeysiis xog jabsasho ama jabsasho looga shakisan yahay xogta PHI.
9. Xaaladaha Degdegga ah ee Caafimaadka (Qaybta 2): Waxaan diiwaanada Qaybta 2 iyadoo aan oggolaansho lagaa haysan siin karnaa shaqaalaha caafimaadka ilaa inti lagama maarmaan u ah in lagu daboolo xaalad degdeg ah oo caafimaad oo daacad ah taas oo ogolaansho kaaga ah oo hore oo xog ogaal ah aan la heli karin.
10. Cilmi-baarista/Hubinta/Qiimaynta Barnaamijka (Qaybta 2): Waxaa laga yaabaa inaan diiwaanada Qaybta 2 iyadoo aan la haysan oggolaanshahaaga oo qoran aan siino shaqaalaha uqalma si ay ugu sameeyaan cilmi-baaris, hubin, ama qiimayn barnaamij iyada oo la raacayo ilaalinada Qaybta iyo mamnuucitaanada dib-u-bixinta diiwaanada.